



SIDA LOO ADEEGSADO KOODHKAAGA QR-KA EE WIC

OO AAD KU ISTICMAALAYSO SUUQYADA BERALEEYDA SHARCIGA AH IYO DUKAANADA BEERAHA

Gunnooyinkaaga bilaha ah ee miraha iyo khudaarta iyo gunnooyinka Farmers Market Nutrition Program (FMNP, Barnaamijka Nafaqada ee Suuqa Beeraleyda) ayaa loo adeegsan karaa koodhka QR ee Special Supplemental Nutrition Program for Women, Infants, and Children (WIC, Barnaamijka Nafaqada dheeraadka ah ahna gaarka ah ee Dumarka, Dhallaanka, iyo Carruurta). Fadlan booqo webseedyada [Miraha WIC](#) iyo [Farmers Market Nutrition Program](#).

Raac tallaabooyinka soo socda si aad u adeegsato koodhkaaga QR ee WIC:



TALLAABADA 1 AAD

Hel suuqa beeraleyda sharciga ah ee WIC ama dukaanka beeraha.

TILMAAN

Booqo abka WICShopper ama arag liiska ku qoran [webseedka FMNP](#).



TALLAABADA 2 AAD

Xaqiiji inaad haysato koodhkaaga QR ee WIC

TILMAAN

Sawir uga qaad koodhkaaga QR taleefankaaga kuna adeegso suuqa beeraleyda ama dukaanka beeraha.



TALLAABADA 3 AAD

Dooro mirahaaga iyo khudaartaada.

TILMAAN

Raadi baareleey muujinaaya astaantaan!



TALLAABADA 4 AAD

Qofka beereleeyda ah ayaa iskaanka marinaaya koodhkaaga QR asagoo adeegsanaaya aalada moobilka kadibna geli cadadka aad iibsantayso.



TALLAABADA 5 AAD

Xaqiiji cadadka iibkaaga kadibna geli BIIN-kaaga 4 god ah ee kaarka WIC.

TILMAAN

Gunnooyinka FMNP ayaa la adeegsan doonaa marka koowaad kahor intaadan isticmaalin gunnooyinkaaga miraha iyo khudaarta WIC! **Ogoow:** Haddii aadan haysan gunnooyin idin ku filan oo daboolaya iibkaaga, waxaad ku dhiibi kartaa qaab kale ama waxaad dooran kartaa inaad iibsato cadadka ugu badan ee aad rabto.

CAAWIMAAD

La xiriir Cascades Support oo aad ka helayso 1-800-841-1410, kudar 3, dooro 2

